



Guddiga PPS waxay hore u sii wadaa furitaanka laba dugsi dhexe

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay hore ugu sii gudbi doonaan qorshayaasha laba dugsi dhexe lagu furayo 2018-19-ka.

Guddiga Waxbarashada ee PPS, ayaa kulankeedii Noofambar 14, ku ansixisay Qaraar 5534 isaga oo codku dhanaa 7-0, kaasi oo Kormeeraha Guud ee Guadalupe Guerrero u tilmaamaya in uu Roseway Heights iyo Harriet Tubman in ka dhigo oo ay noqdaan dugsiyo dhexe, oo leh ardayda fasalka 6-8. Guddigu waxay sidoo kale tilmaantay in sideed dugsi loo bedelo dugsiyo hoose oo leh ardayda laga bilaabo dugsiiga barbaarinta carruurta 'kindergarten' ilaa ardayda fasalka shanaad.

Qaraarku wuxuu lagu sameeyay xuduudo laga kala imaanayo oo loogu talagalay dugsiyada dhexe iyo hoose, iyada oo la sameeyay dugsiyada sare dugsiyada dhexe ee ay ardaydooda u diri doonaan.

Codbixintu waxay timid ka dib markii wada xaajood ballaaran ay yeesheen guddiga iyo ku dhawaad tiro badan oo kulamo dadweyne oo luqaddo badan ka koobnaa. Kormeerihii Guud ee Hore Carole Smith ayaa bilowgii ku baaqday in la furo dugsiyada dhexe waqtiga loogu talagalay sanad dugsiyedkan, laakiin qorshaha dib ayaa loo dhigay sababta oo ah isbeddel ku yimid dhanka hoggaanka iyo arrimo kale.

Kulankeedii Oktoobar 24, , Guddiga waxay u codaysay in ay hore u sii wado qorshaha lagu furayo dugsiyada, laakiin waxaa la socda qorshayaal mustaqbalka la xiriira , oo ay ku jiraan baaritaan buuxa oo dhanka caafimaadka iyo ammaanka ah ee Harriet Tubman. Qaraarka la ansixiyay Talaadadii wuxuu bulshada iyo Guddiga ugu baaqayaa in ay natiijooyinka baaritaannadi u helaan " hab degdeg ah," laakiin wuxuu intaasi ku darayaa in shaqaalaha PPS ay qiimeeyeen in aanay "jirin dhibaato aan wax laga qaban karin oo dhanka caafimaadka iyo badbaadada ah oo la xiriirta furitaanka Harriet Tubman."

Dhismaha waxaa loo qorsheeyay in laga baaro kiimikada lead, radon, asbestos, qurubyada ka soo hara naaftada, caaryada 'mold' iyo iyo maadooyinka keena kansarka 'carcinogens' ee la arki karo. Xubinta Guddiga ee Paul Anthony ayaa Talaadadii ku daray wax ka bedel, kaasi oo lagu ansixiyay cod dhan 7-0, in dugsiiga sidoo kale laga baaro biraha culus ee cadmium, zinc, copper iyo iron oxide.

Sargaalka Madaxa ka ah Hawlgalka ee PPS ee Jerry Vincent ayaa sheegay in ay degmadu kor u qaadayso dadaallada ku saabsan Harriet Tubman, iyada oo mas'uuliyiin ka socota Hay'adda Illaalinta Deegaanka iyo Waaxda Tayada Degaanka kulan lala yeeshay Jimcihii, iyada oo ujeedadu tahay dejinta qorshe aan ka dambayn Diisambar 1. Vincent wuxuu sidoo kale soo sheegay in degmadu ay miisaaniyad u dejisay shaqo lagu xasillinayo dhismaha ee tuurta sare u yaala ee abuuray walwalka ku saabsan suurtagalnimada in dhismuhu dhinac u janjeersamo.

Qaraarku wuxuu Boise-Eliot/Humboldt, Sabin, Irvington iyo Martin Luther King Jr. oo ahaa dugsiyada K-8 u bedeli doonaa dugsiyada hoose ee K-5 ee ardayda u dira Harriet Tubman. Dugsiga dhexe waxaa la gelin doonaa qaababka meelaha looga kala imaanayo labada goobood ee la is qorayo ee Dugsiyada Sare ee Grant iyo Jefferson.

Qorshuhu wuxuu sidoo kale ku baaqayaa in Vestal, Scott, Jason Lee iyo Rose City Park laga dhigo dugsiyada K-5 ee looga kala imaanayo Roseway Heights, kaasi oo noqon doona dugsiyada looga imaanayo Dugsiga Sare ee Madison.

Guddiga ayaa sidoo kale loo tilmaamay in Machadka ACCESS, barnaamijka Waxbarashada Dadka Xirfadda iyo Hibada leh oo hada hoygiisu yahay Rose City Park, laga dhigo mid leh xarun “joogto ah ama ku meel gaar ah” oo qaadi karta 350 arday oo loogu talagalay sanad dugsiyeedka 2018-19-ka. Degmada waxaa sidoo kale loo tilmaamay in ay abuurto barnaamijka TAG oo isku dhafan oo degmada oo dhan ka kooban si uu ugu adeego ardayda dugsiyada xaafadda.

Isbedelku waa qayb ka mid ah qorshe guud oo lagu saxayo isku dheelitir la’aanta dhanka isqorista ee ka jirta degmada ee mas’uuliyiintu rajeynayaan in ay saxaan iyaga oo dugsiyo dheeraad ah oo ah K-8 u bedelaya in ay noqdaan K-5 iyada oo ay jirto saadaalinta 2021 ee furitaanka Dugsiga Dhexe ee Kellogg ee dib loo dhisay. Qaraarku wuxuu sidoo kale degmada ugu baaqayaa in ay abuurto fursaddo jira oo kor loogu qaadayo isqorista Martin Luther King Jr. muddo aan ka dambayn Diisambar 31, 2018-ka.

Isbedelada waa la qaadi doonaa si qoysaska ku nool Waqooyi ama Waqooyi-bari ee Portland loo siiyo dugsiyo ku habboon loo qiyaasay iyada oo sidoo kale la xaqiijinayo in ardaydaasi ka socota bulshooyinka la takooray ee aan taariikh ahaan cid matalaysaa aanay jirin ay u heli lahaayeen wax helitaan loo wada siman yahay oo ku aadan waxbarasho tayo leh oo u diyaarisa ah in ay guuleystaan dugsiyada sare iyo wixii ka dambeeya.